

Xeer Madaxweynaha Jamhuuriyadda lamba. 157 ee 16 Juun 1966

Dhismaha Guddiga Isku Xirka Wasiiradaha ee Habeynta Mooska

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA

Kadib markii la arkay qod. 75 ee Dastuurka;

Kadib markii la arkay qodobadda 3, 16, 20, iyo 21 ee Sharciga lamba. 14 ee 3 Juun 1962 iyo isbedelladii Xeerka Dowliga ah;

Kadib markii la arkay dekreet-sharci lamb 12 ee 26 Setember 1964 oo wax loogaga beddeley sharciga lamba. 8 ee 29 Oktoober 1964 lana xiriirtay howlaha dhaqaalaha ee dalalka dibedda;

Kadib markii la arkay sharci lamba. 203 ee 26 Setembar 1964, sharci lamb 89 ee 16 Juun 1966, lamba. 86266 ee khuseeyey xadideynta Xeer nidaamiyaha howlaha dhaqaalaha ee dalalka dibedda;

Kadib markii la garoowsaday in loo baahan yahay in la nidaamiyo lana hormariyo wax soosaarka, suuqa iyo dhoofiska mooska iyo in la helo kormeer rasmi ah ee daqliga ka soo galo dhoofinta dibedda ee mooska;

Kadib markii la ogaday bahida in si wanaagsan loo isticmaalo cawiimada laga helay dalka Talyaaniga 1966 ilaa 1967 oo dhameed Sh.So. 70 malyan si loo suuq geeyo mooska Somalida;

Kadib markii la tixgeliyey baahida in saldhig adag loo taago sidii mooska Somalidu uu ka qeyb qaato tartanka Talyaaniga iyo kan caalamiga ah kadib markii uu dhamaado muddoda ilaalinta mooska Somaliya;

Kadib markii la aqonsaday in loo baahan yahay in la dhiso Guddi u dhexeeya Wasaaradaha oo horumariya ujeedooyinka sare ku xusan;

Kadib markii la tixgeliyey aragtida Ra'isul Wasiirka.

WAXAA LA SOO SAARAY

Qod. 1

1. Waxaa la dhisay Guddiga isku xira Wasaaradaha si loo ilaaliyo mooska. Guddigas wuxuu ka kooban yahay:

Wasiirka Beeraha iyo Xoolaha	Guddomiye
Wasiirka Maaliyadda	Xubin
Wasiirka Warshadaha & Ganacsiga	“
Wasiirka Qorsheynta	“
Wasiirka Howlaha Guud	“
Wasiirka Isgaarsiinta & Gaadidka	“

2. Tirada sharciga ee shirku waa kala bar ooh al dheeri ah ee xubnaha Guddiga oo mar kasto uu GUddomiyuhu xaadir yahay;
3. Howlaha Xoghayuhu, oo aanan lahayn xaq in uu codkiisa bixyo waxaa yeelan doono sarkaalka ka socda Wasaaradda Beeraha & Xoolaha oo uu Guddomiyuhu magaaabo;

Qod. 2

Guddiga wuxuu leeyahay awoodaha shaqo ee soo socda:

1. In uu nadaamiyo oo uu horumariyo wax soo saarka, suuq geynta iyo dhoofista mooska;

2. In uu qaabilo heshiisyada laga dhex suubiyo cidda keento iyo cidda qaadato mooska ee dalka Talyaaniga, mudda carifan ee loogu tala galay ilaalinta mooska ee suuqa Talyaaniga ama suuqyada kale;
3. Baarista habka ugu wanaagsan ee kharajka wax soo saarka lagu yareen karo, gaadiidka, bakeeynta si loogaga dhigo mooska Somalida ku la tartami karo suuqyada caalamiga ah;
4. Baariskta iyo xal u helidda iyadoo lala tashanaaya beeraleyda soo saarto qorshooyinka lagu hormarin karo wax soo saarka;
5. Oggolanshada Wasaaradda Warshadaha iyo Ganacsiga in ay bixiyo shatiga dhoofista mooska;
6. Takuleeynta horumarint suuqyada hadda jira iyo helista suuqyada cusub ee la eeyn karo mooska;
7. Tala bixinta Wasaarada Warshadaha iyo Ganacsiga si loo hirgeliyo kormeer culus ee kharaj lacagaha qalaad oo ka soo gala beec geynta mooska si daqligaasi aaysan ku baaqan dibedda, si sahlan loo soo iibiyo qalabka beeraleyda ay uu baahdaan, bacrimin iyo keydinta mooska.

Qod. 3

Waxaa heli karo oo keliye shatiga dhoofista sida ku qoran qodobka 1 ee sharciga lamba. 86266 ee 16 Juun 1966 oo la xirira xadideynta Xeer nidaamiya Howlaha Dhaqaalaha ee dibedda kuwa haysta heshiisyo iibinta mooska oo uu Guddigu aqbalay iyadoo la raacaya qodobada sare ku tilmaaman.

Qod. 4

Guddiga isku xira Wasaaradaha waxay shaqadiisa ku eg tahay kadib markii la dhiso hey'ad madax banana oo howlahaas fulin doonta.

Qod. 5

Sharci kasto oo ka soo horjeedan sharcigaan ama khilafaaya waa la buriyey.

Qod. 6

Sharciga wuxuu hirgeli doona isla maalinta lagu soo daabacay Faafinta Rasmiga waxaana lagu keydin doona Keydka Rasmiga ee Shuruucda iyo Xeerarka ee Jamhuuriyadda Somalida.

Waxaa la faraya cid kasto in ay u hoggansanaato sharci una hoggamiso cid kasta.

Muqdisho, 16 Juun 1966.

Aden Abdulle Osman

Rai'sul Wasaaraha

Abdirizak Haji Hussein

Wasiirka Maaliyadda

Ali Omar Scego

Wasiirka Howlaha Guud

Scek Abdulle Mohamud

Wasiirka Qorsheynta Qaranka

Mohamed Ismail Abdi